

HAGAHADHACDADA GIRLS ON THE RUN MINNESOTA DEYRTA 2022 5K



HAGAHADHACDADA GIRLS ON THE RUN MINNESOTA 5K

Girls on the Run Minnesota 5K waa dhacdada ugu dambeysa ee barnaamijkeena 10-ka todobaad, 20 cashar ka dib ee barnaamijka dugsiga, kaas oo isticmaalo awooda orodka si loogu diyaariyo gabdhaha isqadarin waarta iyo noolaansho caafimaadan. Noogu soo biir dabaaldaga bulshada ee caafimaadka, fayoy qabka iyo awooda gabadha!

DIWAANGELINTA SAAXIIBKA ORODKA

Ka qeybgalayaasha iyo tababarayaasha GOTR si toos ah ayaa looga diiwaangeliyaa 5K! Gabar walba waxay u baahantahay inay leedahay Saaxibka Orodka diiwaangashan si ay ugu wehliso maalinta tartanka. Saaxibka Orodka waa qof kastoo weyn oo aad aaminsantahay oo 18+ jir, kaas oo la ordi kara/la socon kara gabadhooda oo la farxi karo inta lagu jiro maalintaan guusha. **Dhammaan Saaxibada Orodka, waaladiinta, iyo saaxibada ordaya 5k waa inay is diiwaangeliyaan. Diiwaangelinta waxaa laga heli karaa www.gotrmn.org. Gabdhaha iyo tababarayaasha uma baahna inay iska diiwaan geliyaan 5K.** Qdimada is diiwaangelinta hore waa \$30, qidmada is diiwaangelinta caadiga ah waa \$35, qidmada maalinta tartanka waa \$40 ee maalinta tartanka, iyo iqtiyaarka bixi waxa aad awoodid. Saaxibada Orodka waxay ka helayaan kooxaha GOTR funaanadahooda iyo istiikarka tartanka ee subaxa tartanka tababarayaasha kooxdooda ee GOTR; ma jirayaan qaadashada baakid gooni ah.

HIRARKA

Dhammaan kooxaha/goobaha waxaa loo xilsaaray midab iftiinka ah si ay u abaabulaan kooxaha ku jiro tuulada GOTR Race Village. Fadlan raadi midabada kooxdaada oo saxiix markii aad timaatid goobta tartanka. Waxaan ku dhawaaqeynaa midibada ee bilowga leenka oo 4-5 daqiiqo oo hakad laga bilaabo saacada 9:00AM.

Midibka Jaalaha: Kooxda A - E

Midibka Oranjiga: Kooxaha F - K

Midibka Gaduudka: Kooxaha L - P

Midibka Baluuga: Kooxaha R - Z

Fadlan imaw inaad timaatid goobta saacada 8:15AM si aad ugu ogolaatid baakinka iyo socodka 15 daqiiqo ee ka imaanshaha aaga baakinka illaa leenka bilowga.

Deyrta 2022

Taariiqda: Axada, Nofeembar 13 2022

Goobta: Minnesota State Fairgrounds, 1690 Como Ave, St. Paul, MN 55108

Saacada: Orodka 5k wuxuu bilaabanayaa saacada 9:00AM, fadlan imaw saacada 8:15AM



HAGAHA DHACDADA GIRLS ON THE RUN MINNESOTA DEYRTA 2022 5K



BAKINKA IYO JAHEYNADA

Baakin bilaash ah waxaa laga helayaa Qeybaha Baakinka MN State Fairgrounds West iyo East Como (1690 Como Ave, St. Paul, MN). Dhammaan albaabada ku aadan Fairgrounds waxaa loo xirayaa dhacdada. Baakinka kadib ku sii soco isgoyska ku aadan Como Ave oo gal MN State Fairgrounds. Waxaan yeelan doonaa tabaruceyaal iyo calaamado kugu hagaya laynka bilawga ee Grandstand Infield. Socodka laga bilaabo meesha baabuurta la dhigto illaa leenka bilowga wuxuu qaadanayaa qiyaastii 15 daqiiqo. Fadlan qorshee inaad timaadid 8:15 si aad ugu ogolaatay waqtiga ciriiriga baabuurta iyo ku lugeynta leenka bilowga si loo helo kooxdaada. Metro Transit sidoo kale wuxuu leeyahay wadooyin la heli karo iyo kooxaha qaar waxay ka soo wada raacayaan bas dugsiga; la hubi tababarayaashaada.

CIMILADA

Tan ayaa u ah maalin muhiim ah ka qeybqaatayaasha GOTR iyo 5K waxaa lagu qabanayaa roob ama iftiin. Haddii xaaladaha banaanka ay noqoto mid aan badqab aheyn, waxaan ku ogeysiineynaa ka qeybqaatayaasha i-meel ahaan iyo warbaahinta bulshada sida ugu dhaqsaha badan oo suurtoogalka ah. Waxaad sidoo kale booqan kartaa bogeyga Facebook wixii aqbaaro ah: www.facebook.com/GOTRMinnesota.

HAB DHAGANKA TARTANKA

Tan ayaa ah dhacdo aan tartan aheyn oo waxaan ku dhiirogelineynaa dhammaan orodyahanada inay raacaan "xawaarahooda farxada." Si loogu cadeeyo koorsada dhammaan, waxaan ka codsaneynaa orodyahanada qunyar socodka ah, kuwa lugeeya iyo kuwa tartiibka u socdo inay ku socdaan midigta. Lama ogolo xayawaanka rabaayada fadlan.

